

Xarumaha Talaalka Johnson & Johnson ee Vermont ayaa dib u Bilaabi doona Markale
Iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka CDC ee halista ah inuu ku dhaco xinjirowga dhiigga waa mid aad u yar

BURLINGTON, VT – Waaxda Caafimaadka Vermont waxay ku dhawaaqday inay dib u bilaabi doonto isticmaalka talaalada Johnson & Johnson. Go'aankan waxaa la gaaray kadib markii ay ku dhawaaqeen FDA iyo Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortaga cuduradda in gudigooda La-talinta ay ogolaadeen in tallaalku yahay mid amaan ah waxtar u leh isticmaalkiisu, iyo in hakadka ku jira meesha illaa 13-ka Abriil laga qaadi doono.

“Waan ku faraxsanahay inaan helno tallaalkan mar labaad si aan reer Vermont uga ilaalino fayraska COVID-19 ka,” ayuu yidhi Meereeyaha caafimaadka Mark Levine, MD. “Waxa ku dhiiri gelinayaa qof kasta oo u qalma talaalku inuu sida ugu dhakhsaha badan u doonto kolba talaalkii la heli karo ee ku haboon.”

Dadka reer Vermont ee da’ doodu tahay 18 jirka ah iyo wixii ka wayn waxa hadda ay is diiwaangelin kara hada xarumaha caafimaadka ee bixiya talaalka hal –qaadashada ah ee Johnson & Johnson . **Si aad isku diiwaan geliso oo aad balan u samaysato, booqo healthvermont.gov/MyVaccine. Hadii aad u baahan tahay caawimaad , wac 855-722-7878 oo guji 1 si aad u hesho adeegyada turjubaada.** Dadka reer Vermont ee 16 iyo 17 jirka ah waxay kaliya u qalma talaalka Pfizer.

“Inkasta oo carqaladayntu ay ahayn mid nasiib-darro ah, in la hubiyo in talaalku amaan yahay ayaa ah waxa ugu weyn ee aan ka walwalsanahay,” ayuu yidhi Dr. Levine . “Marka laga eego dhinaca caafimaadka bulshada, talaabooyinka la qaaday ee hakadka iyo daraasada ah waxay ahaayeen kuwo gebi ahaanba haboon-tani waa cilmiga shaqada. Waxaan mas’uuliyad ka saareynaa inaan hubinno inay dadku ku kalsoon yihiin arrintan, iyo dhamaan tallaalada.”

Vermont waxay ku biirtay inta badan gobolada kale joojinta isticmaalka talaalka ee ku talinta CDC da, ku talisay, iyada oo laga jawaabay in tiro yar oo dadka qaatay talaalka la sheegey in dhiigoodu yeeshay xinjiro. Saraakiisha caafimaadka ee federalku waxay ku dhawaaqeen hakinta si ay ugu oggolaadaan guddiga la-talinta ee CDC da ee ktallaalka waqtiga inay dib u eegaan xog dheeri ah oo ku saabsan waxyeelooyinka la sheegay.

Dr. Levine ayaa sheegey in inta lagu gudajiray hakinta bixiyayaasha daryeelka caafimaadka Vermont la siiyay macluumaad iyo tilmaamo ku saabsan astaamaha xinjirowga dhiiga iyo daawayn caafimaad ee ku haboon. Tilmaamaha la cusboonaysiiyey ayaa la sii wadi doonaa in la bixiyo.

Ku dhawaad 8 milyuun oo qiyaasood oo ah tallaalka Johnson & Johnson ayaa lagu qaatay Maraykanka Warbixinnada keene hakadka ku-meel-gaarka ah waxa ku lug leh nooc dhif ah oo daran oo xinjirowga dhiigga ah oo loo yaqaanno cerebral venous sinus thrombosis (CVST). Dhibaatooyinka waxaa la ogaaday illaa 2 toddobaad ka dib tallaalka.

In kasta oo [dhibaatooyinka](#) soo raaca walaaca ay aad u yar yihiin, haddana FDA iyo CDC waxay ku talinayaan in dadka ay ku dhacaan madax xanuun daran, calool xanuun, lug xanuun ama neefta oo dhibta muddo saddex toddobaad gudahood amarka ay qaataan tallaalka Johnson & Johnson waa inay isla markiiba la xiriiin daryeel caafimaad bixiyahooda.